Hounslow Homes
Managing quality homes for Hounslow

# Sida markii ugu horraysay loo dalbado guri ama loogu guuro guri kale

**Hordhac**

Buugyarahani wuxuu sharxayaa  wixii la samayn lahaa haddii aad rabto inaad markii ugu horraysay dalbato guyaha ijtimaaciga ah. Waxa kale oo uu sharxayaa wixii la samayn lahaa haddii aad ku jirto guri uu leeyahay kawnalku ama ururrada guryaha (housing association) oo aad rabto inaad guurto.  Waxaannu rajaynaynaa inuu buugyarahani kaa caawiyo sidii aad sida ugu dhakhsaha badan ugu heli lahayd guriga aad rabto.

**Sida loo isticmaalo buugyarahan**

Fadlan akhri buugyarahan si aad uga hesho tilmaamo guud oo ku saabsan sidii aad u dalban lahayd guri. Waxa macluumaad dheeraad ah laga heli karaa xafiisyada guryaha ee mandaqadda, iyadoo lala hadlayo Hounslow Homes ama la booqanayo goobta internetka ee ah **www.hounslowhomes.org.uk**.

**Doorarka ay ciyaaraan degmada Hounslow/Hounslow Homes**

Hounslow Homes Ltd waxa la aasaasay 2002 iyadoo ahayd ururkii maamulka guryaha( Arms Length Management Organisation's) ee ugu horreeyay ee dalka laga aasaasay. Hounslow Homes waxa iska leh degmada Hounslow (LBH) waxaanay maamushaa guryaha kawnsalka.

Dhammaan foomamka lagu faahfaahiyay buugyarahan waxa laga soo minguurin karaa (downloaded) goobta internetka ee Hounslow Homes oo cinwaankeedu yahay: www.hounslowhomes.org.uk

Degmada Hounslow oo ah ah cidda leh guryaha ijtimaaciga ah waxay sii yeelan doontaa dhammaan guryaha kawnsalka ee ku yaal Hounslow waxaanay maamuli doontaa qoondaynta guryaha. Hase yeeshee hawlsocodsiinta shaqo maalmeedka waxa maamuli doona Hounslow Homes, oo ah sharikad uu kawnsalku leeyahay.

**Waxaad u baahantahay inaad samayso**

**Foomamka dalabka**

Haddii aad rabto inaad guurto, waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foomka dalabka.

**U kala guurka laba guri**

Haddii aad tahay qof ku jira guri uu kawnsalku leeyahay, waxaad u baahantahay inaad buuxiso foomka dibu dejinta ee Hounslow Homes (housing transfer form). Waxaad

foomkaas ka heli kartaa xafiiskaaga guryaha adigoo telefoon u diraya lambarka wardoonka ee mandaqaddaada. Waxaad foomkaaga ku heli doontaa laba maalmood oo shaqo gudahood.

Foomamka dibu dejinta waa in loo soo diraa xafiiska guryaha ee mandaqadda ee Hounslow Homes ee ugu dhaw mandaqadda aad ku nooshahay, kuwaas oo lagu sajilay bogga 13. Waxaad foom ka soo minguurin kartaa **www.hounslowhomes.org.uk** kaas oo loo baahanyahay inta aad saxeexdo inaad ku soo celiso xafiiska guryaha ee Hounslow Homes ee mandaqaddaada ku yaal.

**Sida guri loo dalbado markii ugu horraysay**

**Dalabadayaasha qidaaca gaarka ah (Private sector applicants)**
Haddii aad gurigaaga ka kiraysatay qof gaar u leh, ama aad la nooshahay waalidkaa ama qaraabo kale (xitaa haddii ay guriga ka kiraysteen kawnsalka) waa inaad buuxisaa foomka dalabka. Unugga dibu dejinta ee kawnsalka ayaa ka shaqeeya foomamka dadka ku jira guryaha si gaar ah loo kiraystay. Si aad u hesho foom fadlan kala xidhiidh qaybta dibudejinta telefoonka ah 020 8583 3814.

**Dadka ku jira guryaha ay leeyihiin ururrada guryuhu (Housing Association** tenants)
Haddii aad ku jirto guryaha ay leeyihiin ururrada guryuhu, Co-op ama Trust, waxaad u baahantahay inaad buuxiso foomka dalabka. Ururrada guryaha foomamkooda waxa laga heli karaa unugga dibu dejinta degmada Hounlsow.

Marka aad foomka dhammaystirto, fadlan adigu shakhsi ahaan keen ama boosta ku soo celi.

Dalabyada cusub ee loo soo qortay guryaha kawnsalka waa in loo diraa Unugga dibu dejinta oo cinwaankiisu yahay: The Civic Centre, Lampton Road, Hounslow TW3 4DN

**Buuxinta foomkaaga**

Aad ayay muhiim u tahay inaad si buuxda uga jawaabto dhammaan su'aalaha ku yaal foomka.. Waxaannu u baahannahay noo sheegto macluumaadka inta ugu badan si aannu qiimayn buuxda ugu samayno duruuftaada oo aannu ku gelinno heerka kugu habboon. Waxa jira qoraallo ah tilmaan oo ku daabacan foomka si ay kuu caawiyaan.

Hadday wax dhibaatooyin ahi kaa haystaan sidii aad u buuxin lahayd foomka, fadlan nagala soo xidhiidh annaguna waxaannu isku deyi doonnaa inaannu telefoonka kaa caawinno.

Haddii aannu sidaas samayn kari wayno, waxaannu kuu qabanqaabin doonnaa inaad timaaddo xafiiska oo lagu caawiyo. Xaaladaha qaarkood, waxaannu kuugu iman karnaa gurigaaga. Haddii ay daruuri noqoto in lagula yeesho waraysi ama booqasho guri, waxaannu qabanqaabin doonnaa in gurigaaga lagugu arko 10 maalmood oo shaqo gudahood kadib markaad nala soo xidhiidho.

**Ka shaqaynta foomkaaga (Processing your form)**

Marka uu foomkaagu na soo gaadho, waxaannu ku shaabbadayn doonnaa taariikhda si aannu u ogaanno taariikhda uu na soo gaadhay. Waxaannu arrintaa ku samayn doonnaa taariikhda uu soo gaadhay xafiiskayaga taariikhdaas oo loo isticmaali doono maalinta dalabkaagu hirgelayo. Waa diiwaangelin laga sameeyo qof kasta oo loo aqbalo in lagu daro liiska guryaha.

Waxaannu intaa kadib eegnaa macluumaadkii aad ku qortay foomka , haddii macluumaakaas wax ka dhimanyihiin waannu kula soo xidhiidhi doonnaa ama haddii aannu kaaga baahannahay macluumaad dheeraad ah. Si aad arrintaas nooga caawiso, fadlan hubi inaad telefoon lagaala soo hadlo aad ku qorto dalabka.

Haddii aannaan dalabkaaga sajili karin, waxaannu kuu soo qori doonnaa warqad waxaanaannu kuu sharxi doonnaa sababta aannaan sidaas u samayn Karin taas oo aannu ku fulin doonno 10 maalmood oo shaqo gudahood kadib marka uu na soo gaadho foomkaagu.

Marka uu na soo gaadho macluumaadka aannu u baahannahay, waxaannu macluumaadkaas ku gelin doonnaa kombuyuutarka 5 maalmood oo shaqo gudahood.

Marka tafaasiishaada la geliyo kombuyuutarka, waxa loo gudbin doonaa xafiiska Locata iyadoo la isticmaalayo khad aamin ah. Waxaad noqon doontaa xubin ka mida Locata, oo ah nidaamka qoondaynta guryaha ee ku salaysan doorashada, waxaanaad heli doontaa xidhmada macluumaadka. Ka eeg bogga 7, **xubin ka noqoshada Locata.**

**Qiimaynaha caafimaaka (Medical assessments)**

Haddii ay kula tahay inay xaaladdaada guryuhu keenayso dhibaato caafimaad ama ay xaaladdaadii hore ee ku saabsanayd caafimaadkaaga ama qof kale oo qoyska ka tirsan ay , fadlan noo sheeg si aannu uga fiirsanno inaad xaq u leedahay in lagu siiyo munaanta in lagu raro.

Marka aad noo sheegto dhibaatooyinka caafimaad, waxaannu kuu soo diri doonnaa foomka qiimaynta caafimaadka oo aannu ku soo diri doonno 5 maalmood oo shaqo gudahood. Waxaannu ka shaqayn doonnaa dalabkaaga ama dibu dejintaada inta aannu sugayno inaad soo celiso foomka caafimaadka.

Waxaad sidaas samayn kartaa adigoo buuxinaya foomka qiimaynta caafimaadka. Waxaad u baahantahay inaad noo sheegto macluumaadka ugu badan e suuragalka ah, sida noocyada iyo inta aad ka qaadato dawooyinka iyo in lagugu daaweeyo dhakhtarka iyo inkale. Uma baahnid inaad dhakhtarka ka soo qaadatid caddayn caafimaad, hase yeeshee haddii aad hore u sii haysay, fadlan ku soo lifaaq foomka qiimaynta caafimaadka.

Haddii aannu dhakhtarkaaga ama cusbataalka uga baahanno macluumaad dheeraad ah, waannu kuu sheegi doonnaa.

Fadlan soo dir ama foomka aad dhammaystirtay adigu keen xafiiska guryaha ee Hounslow Homes ee mandaqaddaada ku yaal haddii aad tahay qof guri ku jira, ama keen Unugga dibu dejinta ama unugga dadka guryaha la' (Homeless Persons Unit) ee degmada Hounslow haddii aad tahay qof guri doon ah. Marka uu na soo gaadho foomkaaga caafimaadku waxaannu ku shaabbadayn doonnaa taariikhda. Waxaannu arrintaa samayn doonnaa isla maalinta uu foomku xafiiskayaga soo gaadho.

waxaannu ka fiirsan doonnaa macluumaadka caafimaadka, haddii loo baahdana waxaannu dalban doonaa talo caafimaad oo mutakhasis ah oo aannu ka dalbanno dhakhtar ama shaqaalaha okibayshan teerabbiga. warqad ayaannu kuu soo qori doonnaa taas oo ay ku qorantahay natiijadu, waxaanaannu sidaas samaynaa muddo ku siman 20 maalmood oo shaqo gudahood kadib markuu na soo gaadho macluumaadka caafimaadku.

Waxaannu kaloo wax ka beddeli doonnaa banaamijkayaga kombuyuutarka si uu u muujiyo wixii lagu soo alo bixiyay taasna waxa lagu samayn doonaa 5 maalmood oo shaqo gudahood kadib markay na soo gaadho wixii lagu taliyay.

## Xaqa aad u leedahay inaad racfaan ka qaadato go'aankayaga

Haddii aanad waafaqsanayn qaar ka mida go'aammadayada, waxaad ka qaadan kartaa racfaan. Haddii aad tahay qof guri doon ah, fadlan racfaankaaga qoraal ahaan ugu soo dir maamulaha dibu dejinta (Rehousing Manager) ama maamulaha qaybta guri la'aanta (Homelessness Manager) oo laga helo: The Civic Centre, Lampton Road, Hounslow TW3 4DN. Dadka guryaha ku jira waxay qoraalkooda u soo dirayaan maamulaha camaliyaadka (Operations Manager), Hounslow Homes, St Catherine's House, 2 Hanworth Road, Feltham, TW13 5AB.

Waxaad u baahan doontaa inaad na siiso macluumaadka ugu badan ee suuragalka ah si aannu uga fiirsanno racfaankaaga. Waxaannu arrintaa ku samayn doonnaa 10 maalmood oo shaqo gudahood kadib marka aannu hello racfaankaaga waxaanaannu kuu soo qori doonnaa warqad aannu kuugu sheegayno go'aankii racfaankaaga iyo asbaabaha go'aanka loo gaadhay.

Haddii aanad ku qanacsanayn go'aankaygaga, waxaad qoraal u diri kartaa sarkaalka cabashooyinka macmiisha ee Hounslow Homes ama degmada Hounslow.

## Xaqa aad u leedahay inaad racfaan ka qaadato qiimaynta caafimaadka

Haddii aanad ku qanacsanayn qiimaynta caafimaadka, waxaad u baahantahay inaad naga dalbato foomka racfaanka, haddii kale waxaad foomkaas ka heli kartaa xafiiska guryaha ee mandaqadda ama Civic Centre. Waxaannu foomka racfaanka kuug soo diri doonnaa 48 saacadood gudahood.

Waa inaad si buuxda u buuxiso foomka racfaanka, adigoo sharxaya sababta aad racfaanka u qaadanayso, kadibna soo celinaaya. Uma baahnid inuu dhakhtarkaagu kaa taageero racfaanka. Marka uu foomku na soo gaadho waxaannu ku shaabbadayn

doonnaa taariikhda. Waxaannu arrintaa samayn doonnaa isla maalinta uu na soo gaadho.

Waxaannu intaa kadib tixraaci doonnaa macluumaadka ku qoran foomka racfaanka foomka caafimaadka ee aad hore noogu soo dirtay kuwaas oo mardanbe laga fiirsan doono. Waxaannu natiijada racfaanka kuugu soo sheegi doonnaa 20 maalmood oo shaqo gudahood.

Waxaannu macluumaadkii noo sajilnaa wax kaga beddeli doonnaa 5 maalmood oo shaqo gudahood marka aannu go'aanka helo si ay uga muuqdaan wixii lagu taliyay markii racfaanka la eegay.

**Locata – Nidaamka qoondaynta guryaha ee ku salaysan doorashada**

Degmada Hounslow waxay ku biirtay afar degmo oo la deris ah iyo dhawr ah ururrada guryaha waxaanay sameeyeen Locata, oo ah nidaamka qoondaynta guryaha ee ku salaysan doorashada.

Markaad xubin ka noqoto Locata, kadib markaad soo buuxiso ee soo celiso foomkaaga dalabka, waxa laguu soo diri doonaa warqad. Warqaddaasu waxay xaqiijinaysaa heerka iyo inta uu le'egyahay guriga aad xaqa u leedahay inaad u soo tartaantaa.

*Locata -* nidaamka qoondaynta guryaha ee ku salaysan doorashada *(Choice based lettings)* waxa macnaheedu yahay inaad u tartami karto guryaha bannaan halkii aad sugi lahayd inuu kawnsalku guri kuu raadiyo.

Haddii aad tahay qof ku jira guri kawnsalku leeyahay, ama kiraystay guri gaar loo leeyahay ama aad tahay qof aan haysan guri, waxaad xubin ka noqon doontaa Locata marka aad soo dalbato guri kawnsalku leeyahay ama in laguu raro guri kale.

Xubnaha Locata waxa la geliyaa mid ka mida afar heer (bands), A,B,C, D, taas oo ku xidhan baahidooda guryaha iyo sida ay taariikhda ugu soo kala horreeyeen heerkaas.

Locata waxay ku siisaa doorasho dheeraad ah oo aad ku doorato meesha aad rabto inaad ku noolaato, iyo nooca guriga aad rabto inaad ku noolaato, hase yeeshee weli guryaha ayaa aad u yar. Taas waxa macnaheedu yahay in laga yaabo inaad muddo dheer sugto inta guri lagu siinaayo.

Xaaladaha qaarkood, waxa laga yaabaa inaanay suuragelin in lagu siiyo guri kawnsalku leeyahay.

Haddii ay sidaasi dhacdo, waxaannu haynaa ra'yi kaa caawinkara inaad hesho guri adigoo eegaya doorashooyinka kale ee kuu furan inaad u guurto guri cusub kuwaas oo ku yaalla bogga 11.

**Miyaad xaq u leedahay Locata?**

Waxa laga yaabaa inaanad xaq u yeelan inaad xubin ka noqoto Locata, haddii:

- Haddii aad tahay qof ku jira oo la siiyay ogaysiiska guriga lagaga saarayo(Notice of Seeking Possession)
- Haddii aad tahay qof guri doonaya oo ay degganaanshihiisa dalku shuruudo ku xidhantahay

- Haddii aad tahay qof guri doonaya oo ku nool degmooyinka deriska ah

Haddii ay arrimaha sare ku khuseeyaan waxaannu kuu soo qori doonnaa warqad ay ku qoranyihiin asbaabaha aannaan kuugu dari karayn liiska Locata. Waxaannu arrintaa ku samayn doonnaa 10 maalmood oo shaqo gudahood kadib markaannu foomka helo.

**Inaad xubin ka noqoto Locata**

Markaad xubin ka noqoto locata waxa laguu soo diri doonaa:

**Warqadda lacag la'aanta ah ee Locata (Locata Freesheet)**

Warqadda lacag la'aanta ah waxa la daabacaa labadii wiigba mar, waxana la helaa jimce dhaaf. Tii u horraysay ayaa laguu soo diray. Waxaad u baahan doontaa inaad cadadyada danbe ka soo qaadato meelaha laga helo sida xafiisyada guryaha ee mandaqadda iyo iyo laybareeriyada. Liis dhammaystiran oo ah meelaha laga helo warqadda lacag la'aanta ah (freesheet) ayaa ku qoran warqaddan xaggeeda danbe. Waxa kale oo aad ka soo min guurin kartaa goobta internetka ee cinwaankeedu yahay **www.locata.org**

Waxa kale oo aad dalban kartaa in boosta laguu soo dhigo. Waxa laga yaabaa in lagu waydiiyo kharash yar oo lagu daboolo kharashka boosta iyo maamulka. Tafaasiisha sida arrintaas loo qabanqaabiyaa waxay ku taallaa tacliimaadka loogu talagalay adeeg isticmaalaha (user guide).

**Waraaqaha lagu tartamo iyo buqshadaha**

Waxa kale oo aad heli doontaa waraaqaha tartanka lagu qorto (coupons) si aad boosta ugu soo dirto. Waxa hore loogu sii qoray lambarkaaga aqoonsiga ee Locata (Locata Individual Number (LIN)) sidaa darteed cid kale ha siinnin. Waxa kale oo aad guryaha ugu tartami kartaa adigoo isticmaalaya telefoonka, qoraalka telefoonka lagu diro(SMS text message) iyo internetka. Tafaasiisha sida arrintaas loo sameeyo waxay ku taallaa hagaha loogu talagalay dadka adeegga isticmaala.

**Maxaan sameeyaa marka aan helo xidhmadayda?**

Si fiican u akhri oo hubi inuu macluumaadku sax yahay. Meel gaar ah ku qoro lambarkaaga tixraaca (LIN number).

Haddii ay kula tahay in xidhmadaada macluumaadka wax ka khaldanyihiin, isla markiiba nala soo xidhiidh. Haddii aad tahay qof guri ku jira, la xidhiidh xafiiska guryaha ee Hounslow Homes ee mandaqaddaada ku yaal. Haddii aad tahay qof guri doon ah, la xidhiidh Unugga dibu dejinta, ama qofka kiiskaaga u xilsaaran haddii aad guri dalbatay adiga oo ah dadka aan guryaha haysan (homeless). Waxaannu isku deyi doonnaa inaannu waraysigaaga telefoonka kaga jawaabno. Haddii aannaan telefoonka kaga jawaabi karin, waxaannu qabanqaabin doonnaa inaannu kugu aragno xafiiskayaga ama gurigaaga. Waxaannu qabanqaabin doonnaa inaannu kugu aragno 10 maalmood oo shaqo gudahood kadib markaad nala soo xidhiidho. Imminka waxaad diyaar u tahay inaad bilawdo inaad guryaha u tartanto.

**U tartanka guryaha (Bidding)**

Waxaad cadadkii kasta ee Locata u tartami kartaa illaa 3 guri. Wakhtiga ay xidhimayaan tartanku waxay ku daabacantahay warqadda lacag la'aanta ah xaggeeda hore. Tartannada lala soo habsaamo lama tixgelin doono, sidaa darteed haddii aad doorato

inaad tartankaaga ku dirto boosta, hubi inaad warqaddaada tartanka muddo ka hor u dirto xafiiska Locata.

Tix raac warqadda la socota xidhmada macluumaadka ee laguu soo diray si aad u hubiso inaad dalbanayso guri baaxaddiisu le'egtahay kii laguugu talagalay, oo akhri hagaha, waxa kale oo aad hubisaa inaad fahamto astaamaha kala duwan ee ku yaal xayaysiiska. Waxa laga yaabaa inay marka hore u ekaato sidii wax jahawareerin keenaya, haddii aad u baahato wax caawimo ah, nala soo xidhiidh.

Waxaannu qabanqaabin doonnaa inaannu kugu waraysanno gurigaaga ama xafiiskayaga, waxaanaannu si faahfaahsan kuugu sharxi doonaa sida guryaha loogu tartamo. Waxaannu arrintaa ku samayn doonnaa 10 maalmood oo shaqo gudahood kadib markaad nala soo xidhiidho. Hadii aad rabto waxaad qabanqaabin kartaa inuu qof saaxiibkaa ahi ku soo raaco marka lagu waraysanayo. Waxa laga yaabaa inaannu xaalado naadir ah guri kaa siinno meelo ka baxsan nidaamka Locata. Fadlan eeg bogga 11 "qabanqaabooyinka gaarka ah".

Guryaha la xayaysiiyo intooda badan waxa loo xayaysiiyaa dadka guryaha ku jira iyo/ama dadka guri doonka ah ee ku nool xaafadda guriga laga xayaysiiyay. Arrintu si kastaba ha ahaatee, ugu yaraan 10kii guriba 1 ayaa loogu talagalay inay u tartamaan cid kastaa oo xaafadaha kala duwan deggani.

Qayb gaar ah ayay kaga qoranyihiin warqadda lacag la'aanta ah.

Hubi inaad u tartanto guryaha aad xaqa u leedahay inaad u tartanto oo keliya, haddii kale tartankaaga lama tixgelin doono.

Marka ay dhaafto muddadii tartanku xidhmayay, dhammaan tartannadii ay soo gudbiyeen xubnuhu ayaa lagaga shaqeeyaa xafiiska dhexe ee Locata.

Liistooyinka xubnaha tartanka ka soo qayb galay ayaa loo gudbiyaa degmooyinka shuraakda ah, liikaas waxaannu ku magacawnaa "shortlists".

**Tafaasiishaadu sax ma tahay?**

Aad ayay muhiim u tahay inaannu hubinno inay tafaasiisha aannu kaa haynaa ay sax tahay, sidaa daraaddeed waxaannu eegi doonnaa dalabka inta aannaan qofka guri ugu yeedhin.

Taas waxa macnaheedu yahay in laga yaabo inaannu u baahanno inaannu ku soo booqanno oo aannu xaqiijinno inay tafaasiishaadu la mid tahay tii aad na siisay markii aad dalabka samaysay. Ama waxa laga yaabaa inaannu kaa dalbanno inaad xafiiskayaga timaaddo.

Waxaannu ku dadaali doonnaa inaannu arrintaa ku samayno 2 maalmood oo shaqo gudahood kadib marka uu na soo gaadho liisku (shortlist). Waa muhiim inaad ku dadaasho in lagu helo si aannu kuu soo booqanno aannu sida ugu dhakhsaha badan kuugu waraysanno. Waxa laga yaabaa inaannu u baahanno inaannu aragno waraaqihii sida warqaddii dhalashada, sidaa darted fadlan sii diyaari.

**Bixinta guryaha (Offer)**

Kadib marka la eego duruuftaada waxa si rasmi ah laguugu soo bandhigi doonaa gurigii lagu siin lahaa.

Si guryaha loogu kireeyo si dhakhso ah waxaannu sida qaalibka ah inay guriga arkaan ku marti qaadnaa saddex qoys ama qof. Warqadda guriga laguugu soo bandhigayo ayaa kuu sheegi doonta haddii aad leedahay mudnaanta koowaad, labaad ama saddexaad. Waxaannu had iyo jeer guriga siinnaa qofka leh mudnaanta koowaad, hase yeeshee mararka qaar waxa guryaha la siiyaa qofka leh mudnaanta labaad ama saddexaad haddii uu qofkii mudnaana koowaad lahaa uu diido inuu guriga qaato.

Waxa lagu siin doonaaa taariikh iyo wakhti aad soo eegto guriga. Waxaad u baahan doontaa inaad adigu guriga tagto, waxa guriga kugula kulmi doona sarkaalka guryaha oo ku tusi doona guriga kaagana jawaabi doona wixii su'aalo ah ee ku saabsan dayactirka, kirada iwm.

Waxa lagugu dhiirri gelin doonaa inaad go'aan ka gaadho inaad aqbasho guriga kadib markaad aragto, hase yeeshee haddii aanad markaas go'aan gaadhi Karin waxaannu ku siin doonnaa 24 saacadood oo aad go'aan ku soo gaadho kadib markaad guriga aragto.

Waa inaad nagula soo xidhiidhaa 24 saacadood gudahood, haddii kale waxaannu ictibaarin doonnaa inaanad guriga u baahnayn, waxana laga yaabaa inaannu qof kale siinno guriga.

Haddii aanad rabin waad diidi kartaa laakiin faadlan si fiican uga feker…waxa laga yaabaa inay muddo dheer qaadato intaad guri kale ku guulaysan lahayd.

**Jawaabcelin**

Iyadoo ay sababtu tahay inay xubnaha Locata aad uga badanyihiin guryaha la hayo, ayaannaan qof kasta guri u siin Karin si degdeg ah. Run ahaantii dad badan ayaa muddo aad u dheer suga intii guri la siin lahaa.

Waxaad warqadda lacag la'aanta ah ee Locata dhinaceeda danbe ku arki kartaa heerka ay liiska kaga jireen iyo muddada ay sugayeen dadka guryaha la siiyay.

Xusuusnow, guryaha leh beerta gaarka u ahi had iyo jeer waxa u soo tartama tiro aad u badan oo dad ah.

Waxaannu kaaga warrami karnaa doorashooyin kale, oo laga yaabo inay kaa caawiyaan sidaad u heli lahayd guri cusub.

Fadlan eeg qaybta ka bilaabmaysa bogga xiga.

**Qabanqaabooyinka gaarka ah (Special Arrangements)**

Haddii aad tahay qof guri ku jira oo ay ku haystaan dhibaatooyin gaar ahi sida qalalaasaha guryaha ama hagardaamo, waxa laga yaabaa inaannu samayno qabanqaabooyin aannu kaaga caawinno inaad u guurto si dhakhso ah.

Waa muhiim inaad sida ugu dhakhsaha badan noola hadasho si aannu kuula falanqayno doorashooyinka noo furan. Telefoon noo soo dir ama xafiiska kaalay. Waxaannu ku dadaali doonnaa in isla markiiba lagu waraysto. Haddii aad rabtoto inuu ku waraysto qof shaqaalaha ka tirsan oo ah lab ama dhaddig fadlan noo sheeg.

Waxa laga yaabaa inaannu ka fiirsanno in lagu siiyo "guri mudnaanta laeh". Arrintaasi waxay keentaa in si degdeg ah guri laguu siiyo. Sarkaalka guryaha ayaa kuu sharxi

doona nidaamka oo hadday habboontahay kiiskaaga u gudbiya guddiga ah saraakiisha sare.

Iyadoo ay shardi u tahay inaad noo sheegto macluumaadka aannu u baahannahay, ayaa waxaannu arrintaa ku samayn doonnaa 15 maalmood oo shaqo gudahood.

Haddii aad leedahay baahiyo gaar ah sida dhibaatooyinka caafimaadka oo daran iyo guriga oo uu dadku ka badanyahay, waxa laga yaabaa inaannu kiiskaaga u gudbinno guddiga daryeelka ijtimaaciga ah(social welfare panel).

**doorashooyinka kale ee aad ugu guuri lahayd guri cusub**

**Guri kala beddelasho**

Haddii aad tahay qof guri ku jira guri kawnsalku leeyahay ama ku jira guri heshiiskiisa degganaanshuhu rasmi yahay (assured tenancy) oo ay leeyihiin ururrada guryuhu, oo ku yaalla xaafad kale waxa laga yaabaa inaad xaq u yeelato guriga cid kale kala beddelataan. Waxa arrintaas loo yaqaannaa "Mutual Exchange".

Taas waxa macnaheedu yahay inaad oggolaato inaad gurigaaga cid kale guri kaga beddelato. Mararka qaar waxa ka qayb noqon kara in ka badan laba guri.

Si aad isugu sajiso guri kala beddelashada waxaad u baahantahay inaad buuxiso foomka dalabka. Waxa foomka laga heli karaa dhammaan xafiisyada guryah ee Hounslow Homes.

**Nidaamka Lawn (Lawn scheme)**

Nidaamkani wuxuu fursad kuu siinayaa inaad ka guurto London. Kawnsallada iyo Ururrada guryaha ee guryaha haya ayaa ka qayb qaata nidaamka. Qaar ayaa haya guryo leh beero oo loo heli karo si aad uga dhakhso badan sidii looga helilahaa London. Arrintu si kastaba ha ahaatee, gurigu wuu kaa fogyahay, tusaale ahaan, waxa laa yaabaa inuu ku yaallo Midlands, Scotland iyo Wales. Sidaa daraaddeed ayay muhiim u tahay inaad hubiso inaad rabto inaad guurto, sababta oo ah haddii aad guurto oo aad meeshaad u guurtay jeclaan waydo, dhibaato wayn ayay noqonaysaa sidii aad ugu soo laaban lahayd London.

Haddii aad xiisaynayso inaad guurto, fadlan telefoon u soo dir xafiiska guryaha ee mandaqaddaada kadibna waxa laguu soo diri doonaa macluumaad ku saabsan nidaamka.

Waxaad kaloo booqan kartaa goobta internetka ee ah **www.lawn.org.uk**

**Boos iswaydaarsasho**

Nidaamkan wuxuu ku dhiirrigeliyaa dadka dadka haysta qolal dheeraad ah oo anay u baahnayn inay ku beddeshaan guryo kii hore ka yar, iyadoo la siinayo qaddar lacag ah marka uu soo celiyo guriga. Wixii macluumaad ah iyo foomka dalabka fadlan kala xidhiidh xafiiska guryaha ee mandaqaddaada.

**Guryaha dadka lagu ilaaliyo (Sheltered Housing)**

Waxa jiraa nidaamyo kala duwan oo degmada ka jira oo bixiya fursado ah guryo madax bannaani loogu noolaado oo loogu talagalay dadka da'doodu ka wayntahay 60jir, oo ay

dheertahay ammaanka dheeraadka ah ee uu wato maamulaha guryaha dadka lagu hayo. Kala xidhiidh xafiiskaaga guryaha si aad ula falanqayso guryaha dadka lagu hayo.

**Xidhiidho waxtar leh**
**Hounslow Homes**

**Mandaqadda dhexe – Hounslow iyo Isleworth/Heston iyo Cranford**
020 8583 4382
020 8583 3959 (minicom)
The Civic Centre, Lampton Road, Hounslow, TW3 4DN
Email: info.housingcentral@ hounslowhomes.org.uk

**Mandaqadda bariga – Chiswick/Brentford**
020 8583 4220
020 8583 4390 (minicom)
Chiswick Town Hall, Heathfield Terrace, Chiswick, W4 4JE
or 58 – 59 Brentford High Street, Brentford, TW8 OAH
Email: info.housingeast@ hounslowhomes.org.uk

**Mandaqada galbeedka – Hanworth, Bedfont iyo Feltham**
020 8583 4383
020 8583 4387 (minicom)
St Catherine’s House, 2 Hanworth Road, Feltham, TW13 5AB
Email: info.housingcentral@ hounslowhomes.org.uk

**London Borough of Hounslow**

**Unugga dadka guri la’aantu hayso**
The London Borough of Hounslow,
Civic Centre, Lampton Road, Hounslow TW3 4DN.

**Unugga dibu dejinta**
The London Borough of Hounslow
Civic Centre, Lampton Road, Hounslow TW3 4DN.

Haddii aad tahay qof guri doon ah soo wac 020 8583 4525